

Sheego Lacagtaada



Waxaad u qalmi kartaa lacag gaaraysa **\$6,000** ama ka badan oo ah cashuur celintaada ah marka aad sheegato **Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo** iyo **Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo**

1

Waxaad raadsataa website **LACAG LA'AAN AH** oo cashuurta laga buuxiyo*

Booqo irs.treasury.gov/freetaxprep ama wac **800-906-9887**.

2

Fiiri in aad u qalanto iyo in kale

Tirada lacagta laga yaabo in aad hesho ka ogow eitcoutreach.org/help.

3

Cashuurtaada xaree

Booqo website-ka lacag la'aanta ah adiga oo booqanaya muddo aan ka dambayn Abriil 18 si aad u xarayso cashuurtaada sidoo kalena u hesho lacagtaada cashuur celinta.

*Waxaad wali sheegan kartaa lacagaha cashuurta lagu xisaabiyo (tax credits) haddii aan heli kari waydo website-ka lacag la'aan ah oo cashuurta laga buuxiyo.

Goorma ayay tahay in aad xarayso cashuurta?

Taariikhda:

Wakhtiga:

Goobta:

Telefoonka:

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo eitcoutreach.org/help ama waxaad IRS ka wacdaa **1-800-829-1040**.

MA U QALMAA?

Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo (Earned Income Tax Credit) iyo Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo (Child Tax Credit) waa faa'iidooyin cashuurta la xiriira oo loogu tala galay dadka shaqeeya. Waxaa aga yaabaa in lacag yar cashuurta lagugu yeesho islamarkaana ay lacagi kuu soo laabato!

Sheegashada lacagahani ma saameyn doonto u qalmidaada adeegyada kale sida SNAP (kaararka cuntada), SSI, Medicaid, taageerada lacageed, ama guryaha dadweynaha. Haddii aad kaydato cashuur celintaada, laguma xisaabinayo xadka u yaala wixii faa'iido barnaamij lacageed/hanti ah ee federaalku ay bixiso muddo illaa 12 bilood ah ka dib marka lacagta la soo celiyay la helo.

HADDII AAD LEEDAHAY CARRUUR

- Da'da:** Si aad u heshid EITC, carruurta waa in ay ka yar yihiin 19 sanadka 2016 (ardayda waqtiga buuxa waa in ay ka yar yihiin 24 iyadoo carruurta sida buuxda ee rasmiga ah naafada ah da' kasta ay jiri karaan). Si aad u heshid CTC, carruurta waa inay ka yar yihiin 17 marka la gaaro dhamaadka sanadka 2016.
- Deganaanshaha:** Carruurta waa in ay kula noolaayeen wax ka badan kala bar sanadka 2016.
- Dakhliga 2016:** Si aad u heshid CTC, Haddii aad samaysay wax ka badan \$3,000, waxaad sheegan kartaa lacag gaaraysa \$1,000 cunugiiba. Si aad u heshid EITC, lacagaha aad samaysaa waa in ay ka yar yihiin xadkan la dejiyay ee soo socda:

Carruurta	Qofka kaliya	Labbada isqaba	EITC illaa:
1	\$39,296	\$44,846	\$3,373
2	\$44,648	\$50,198	\$5,572
3 iyo ka badan	\$47,955	\$53,505	\$6,269

Waxa ay tahay in la soo qaato marka website-ka lacag la'aanta ah cashuurta laga buuxinayo

- Aqoonsi Sawir leh oo sax ah
- Kaarka Social Security-ga ama warqadda cadaynta Lambarka Social Security-ga, ama ITIN
- Foomamka W-2 ama 1099
- Cadaynta caymiska caafimaad (foomamka 1095-A, 1095-B, ama 1095-C)

HADDII AADAN LAHAYN CARRUUR

- Da'da:** Waa in ay da'daadu u dhaxaysaa 25 iyo 64.
- Dakhliga 2016:** Haddii aad samaysay wax ka yar \$14,880 (\$20,430 haddii aad guursatay), waxaad heli karaa lacagta EITC oo gaaraysa illaa \$506.

HADDII AADAN HAYSAN JINSIYADDA MARAYKANKA

- EITC:** Adiga, qofka aad isqabtaan iyo cunug kasta oo aad sheegato waa in ay leeyihiin Lambarka Social Security-ga oo sax ah.
- CTC:** Adiga, qofka aad isqabtaan iyo cunug kasta oo aad sheegato waa in ay leeyihiin Lambarka Social Security-ga ama Lambarka Aqoonsiga Cashuurta ee Shakhsiga (ITIN).

Caymiska caafimaad

Haddii aadan lahayn caymis caafimaad Lacagta Caymis ee la sii bixiyay ee Cashuurta lagu Xisaabinayo "Premium Tax Credit"! Isdiiwaan-gali inta u dhaxaysa Noofambar 1, 2016 iyo Janaayo Maarso 31, 2017. Dadka qaarkiis ee aanan lahayn caymis waxaa suuragal in ay la soo gudboonaato ciqaabi. Macluumaad dheeraad ah ayaad ka heli kartaa **1-800-318-2596** ama **www.HealthCare.gov**.